

Xeerka 28^{KA} Jannaayo 1958, lamba. 5 diwaan.

Marin xagga Goddoonka Golaha Wasiirrada, ee Waaxda Daraasaadka, ee Wasaaradda Arrimaha Bulshada.

MAMULAHA

Markuu arkay xeerka 13^{ka} Maajo 1958, lamba. 78, oo la xiriira Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya;

Markuu aqoonsaday fursadda ah in Golaha Wasiirrada la siiyo Ikhtisaaska Waaxda Daraasaadka iyo adeegyada la xiriira, oo hadda lagu aaminay, sida uu qabo qodobka 36aad, ee Xeerka kor lagu soo xigtay, Wasaaradda Arrimaha Bulshada;

Markuu tixgeliyey, taas darteed, baahida loo qabo in wax-ka-beddel lagu sameeyo Nidaamka Xukuumadda, ee Soomaaliya;

Asaga oo cuskanaaya awoodda uu siinayo qodobka 11aad, ee Sharciga 7^{da} Maajo 1956, lamba. 1;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Markuu soo Jeediyey Wasiirka Kowaad, oo la tashaday Wasiirka Arrimaha Bulshada;

WUXUU XEERINAYAA

Qod. 1

Waaxda Daraasaadka iyo adeegyada la xiriira, ee Wasaaradda Arrimaha Bulshada, waxa ay u gudbayaa ikhtisaaska Guddoonka Golaha Wasiirrada.

Qod. 2

Waajibaadka la siiyey Wasaaradda Arrimaha Bulshada waxaa wax laga beddelay markii la arkay waxa uu dhigayo qodobka 1aad, ee hore.

Qod. 3

Wareejinta Guddoonka Golaha Wasiirrada loo wareejiyey Waaxda Daraasaadka iyo adeegyada la xiriira waa in loo qaataa in la sameeyey taariikhda 1^{da} Jannaayo 1958.

Muqdisho, 28^{ka} Jannaayo 1958

P. Maamulaha

Piero Franca

Cabdullahi Ciise Maxamuud

Shekh Cali Jumcaale

Waa arkay waana Diiwaangeliyey – diw. lamba. 1, Xaashi lamba. 88

Muqdisho, 30^{ka} Jannaayo 1958.

Hanti-dhowraha Xisaabaha: **Spadaro.**